The Royal Children's Hospital Melbourne

Barnaamijka Baarista Maqalka Ilmaha yar ee Fiktooriya

# Baarista maqalka ilmahaaga



Victorian Infant Hearing Screening Program

## Waa maxay baarista maqalka ilmaha dhashay?

**Ilmahaagu wuxuu heli doonaa dhowr baaritaan caafimaad oo isdabajooga ka dib markuu dhasho – baarista maqalka ilmaha dhashay waxay ka mid tahay baaritaanadaa. Waa lacag la'aan, waa dedgeg waana sahlan tahay in la baaro ilmahaaga maqalkiisa. Baarista maqalka ilmaha dhashay wuxuu muujiyaa carruurta u baahan inay sameeyaan baaritaan maqal oo buuxa. Fiktooriya gudaheeda, baarista maqalka ilmaha yar waxaa sameeya Victorian Infant Hearing Screening Program (VIHSP).**

## Maxaa baaristaani muhiim u tahay?

Tira aad u yar oo carruura ayaa dhalata sanad walba iyaga oo dhega la'. Markay koraanba, dhega la'aantaanu waxay saamayn kartaa horumarka hadalkooda sidaas darteed in waqti hore la ogaado waa muhiim. Dhega la'aantu waxaa laga yaabaa in aanay u muuqan qoyska dhowrka asbuuc oo ugu horeeya nolosha ilmaha, laakiin badanaa baarista maqalka ayaa lagu ogaan karaa.

Haddii aanu nahay VIHSP, ujeedadayadu waa caawinta in la ogaado sida ugu dhaqsa badan haddii uu jiro ilma dhega la'aan qaba. Ogaansho waqti hore ah macneheedu waxa weeye dhamaan qoysasku waxay helli karaan bilawga talo wanaagsan iyo kaalmo, iyada oo la siinayo ilmaha qaba bilawga ugu fiican noloshooda.

## Maxaa dhacaya haddii ilmahaaga aan lagu baari karin isbitaalka?

Carruurta qaarkood waxaa laga yaabaa in aanay hellin baaristooda VIHSP ka hor inta aanay ka bixin isbitaalka. Tan waxaa sabab noqon karta iyada oo degdeg aad uga baxdaan isbitaalka adiga iyo ilmahaagu, ama ilmahaaga ayaan weli xasiloonayn si loo sameeyo baarista. Haddii aan ilmahaaga la baarin inta aanay ka bixin isbitaalka, waanu kula soo xiriiraynaa si aad u samayso baaritaanka.

Carruurtaada ku jirta Unuga Daryeelka Culus ee Ilmaha Dhashay (ICU), kuwaas oo ku dhashay 34 asbuuc, waxaanu ku samaynaynaa baaritaan sida ugu dhaqsaha badan ee ilmahaagu diyaar u noqdo in uu isbitaalka ka baxo oo ay guriga aadaan.

## Goorma, sideese loo samaynayaa baarista maqalka?

Waxaanu isku deyeynaa in aan u baarno sida ugu dhaqsaha badan dhalashada ka dib, waxaase shardi ah inay caafimaad qabaan oo xasiloon yihiin. Marka baarista la samaynayo, qofka samaynaya baarista ayaa saari doona qori yaryar oo dareen qaade leh ilmahaaga dhafoorkiisa, garabka iyo luqunta gadaasheeda, iyo dabool-dhegood jilicsan labada dhegoodba. Kuwaan waxaa lagu dhejin doona unuga Automated Auditory Brainstem Response (AABR). Dhawaaqyo dhaqaaq samaynaya ayaa lagu ruxayaa dhegahooda iyada oo la sii marinayo dabool-dhegoodka.

Marka ilmahaagu xasilo ama seexdo, baaristu badanaa waxay qaadan doontaa toban daqiiqo. Baaristu xanuun ma leh badanaana ilmahaaga xasiloonida ka qaadi mayso. Waa lagu soo dhowaynayaa in aad la joogto ilmahaaga waadna haysan kartaa ama naas nuujin kartaa ilmahaaga inta baaristu socoto.

Waxaanu ku weydiisan doonaa inaad saxiixdo warqad qoran inta aan ilmahaaga la baarin. Haddii aad jeclaan lahayd in aan ilmahaaga lagu samayn baarista dhegaha, fadlan u sheeg baaraha VIHSP inuu ogaado. Waxaanu ku weydiisanaynaa inaad saxiido warqad gooni ah oo ah inaad baarista ka cudur daaratay. Haddii aad bedesho maskaxdaada oo aad dabaeed go’aansato in aad doonayso in ilmahaaga maqalkiisa la baaro, taasna waa la qabanqaabin karaa.

## Sidee ku ogaanayaa natiijada?

Waxaa lagu siin doona natiijada isla marka la dhameeyo baarista. Natiijooyinka ayaa laga yaabaa inay soo jeediyaan in ilmahaagu u baahan yahay in lagu sameeyo baaritaan kale oo ilmaha dhashay ama laguu xawilo mid ka faahfaahsan oo uu samaynayo maqal-yaqaan. Baaritaano kale oo siyaada ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo haddii ilmahaagu aanu xasiloonayn inta baaristu socoto, ama dheguhu xirnaayeen (sida dheecaan) dhecaan dartiis. In laguu xawilo baaritaan faahfaahsan macneheedu maaha in ilmahaagu dhega la’ yahay.

## Maxaa dhacaya baarista ka dib?

Waxaanu ku diiwaangelin doonaa natiijada ilmahaaga Diiwaanka Horumarka iyo Caafimaadkayga “My Health and Development Record”. Haddii ilmahaaga la baaro inta uu isbitaalka ku jiro, waxaanu ku qoraynaa natiijada diiwaanka isbitaalka.

Ilmahaaga natiijadiisa ayaa iyada lagu diiwaangelin doona barta-xogta ee VIHSP. Tani waa xog qarsoodi ah, oo lagu ilaalio laguna hayo diiwaan. Waxaad weydiisan kartaa koobiga macluumaadka waqtigaad rabto. Barta-xogta VIHSP waxaa loo isticmaalaa in lagula socdo laguna qiimeeyo barnaamijka baarista maqalka ilmaha dhashay. Haddii macluumaadka loo isticmaalo cilmi baaris darteed, macluumaadka kuu muujinaya adiga ama ilmahaaga lama muujinayo. Haddii aad jeclaan lahayd inaad ogaato wax intaas ka badan oo ku saabsan wixii ku dhacay ilmahaaga macluumaadkiisa fadlan la hadal Maamulaha goobta VIHSP. (meesha lagala xiriirayaa waxay ku taallaa xaashida gadaasheeda).

Haddii ilmahaagu baahan yahay in loo xawilo baaritaan siyaada ah, Adeega Kaalmada Hore ayaa ku siinaya kaalma siyaada ah. Haddii ilmahaaga lagu samaynayo baaritaan intaas ka badan, VIHSP waxa laga yaabaa inay u baahan tahay inuu kula wadaago faahfaahinta dhalashada, faahfaahinta meesha lagala xiriirayo iyo natiijooyinka baarista/maqalka dhakhtarkaaga maqalka carruurta, dhakhtarka, kalkaalisada caafimaadka Ilmaha iyo Hooyada, Victorian Deaf Education Institute, Adeega Faragelinta ee ilmanimada hore ama mihnadlayaasha waxbarashada iyo caafimaadka kale. Arrintu waa sidaas in caafimaadka mihnadlayaashu ay dib u eegi karaan natiijooyinka, waxayna qorshayn karaan adeegyada ugu fiican ilmahaaga, ama daaweyn kasta oo loo baahan yahay.

## Maqalku wuxuu is bedeli karaa isla markiiba

Waa muhiim inaad la socoto ilmahaaga maqalkiisa markay korayaan. Haddii aad welwel ka qabto ilmahaaga maqalkiisa, hadalkiisa ama horumarka luqada, xataa hadday ku gudbeen baarista maqalka, waxaad had iyo jeer qabanqaabin kartaa baaritaan maqal oo kale. Waxaad wacaysaa keliya rugta maqalka si toos ah, ama weydii kalkaalisadaada caafimaadka ama dhakhtarka qoyska si laguugu qabanqaabiyo. VIHSP ayaa loo sheegi doona natijada maqalka ilmahaaga.

## Su’allaha badanaa la isweydiiyo

### Ilmahaygu waa gartaa dhawaaqa dheer sidaas awgeed maxaa loo baarayaa ama la iigu dirayaa maqal-yaqaan?

Dhega la’aantu way ka weyn tahay wax lagu maqlo dhawaaq weyn. Carruurta badankeed qabta dhega la’aanta waa dareemi karaan dhawaaqa dheer. Dhawaaqa ugu muhiimsani waa hadalka horumarka hadalkuna waa dhawaaq khafiif ah taasina waa adag tahay in lagu tijaabiyo carruurta dhalatay iyada oo aan la isticmaalin qalabka qofka aqoonta u leh.

### Baaristu amaan ma tahay? Waa maxay khataraha baaristu?

Baarista maqalku waa degdeg waana amaan. Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu la kulmo raaxa daro marka laga qaado daboolka-dhegta. Waxaa jirta helis yar oo aan baarista maqalku qaban karin ilmaha yar oo leh maqalka u baahan baaris siyaada ah.

### Waa maxay khatarta haddaan la baarin maqalka? Ma jiraa xalka oo aan ahayn baarista?

Khatarta ugu weyn waa in aan la samayn barista maqalka oo dib u dhigta helista dhibta haddii ilmuhu aanu qabin maqal la’aan. Horay ka ogaantu waxay u ogolaataa caawima hore taas oo siisa ilmaha bilawga ugu fiican. Ma jiro xal kale oo ka fiican baarista Maqalka ilma yar.

**Xasuuso**
Maqalka da’ kasta waa baari karaa

## Wax su'aalla ama welwel ah?

**La xiriir VIHSP**

La hadal baaraha VIHSP

VIHSP Xafiiska Weyn (Faahfaahinta hoose)

VIHSP Maamulaha Goobta


**VIHSP Xafiiska Weyn**

The Royal Children's Hospital Melbourne
Centre for Community Child Health
50 Flemington Road Parkville
Victoria 3052 Australia
TELEFOON +61 3 9345 4941
EMAIL email.vihsp@rch.org.au
www.vihsp.org.au


**Melbourne Children's**

A world leader in child and adolescent health

The Royal Children's Hospital Melbourne

Murdoch Childrens Research Institute

The University of Melbourne